# CUTUBKA 1-aad
# QODOBBO HOR-DHAC AH
## Qodobka 1-aad
## Eray Bixin

Xeerkan gudihiisa haddii aan si kale loo fasirin, ereyada soo socda waxaa micnahoodu noqonayaa sidan;-

| No | Erayga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1. | **Xeer** | Waxaa loola jeedaa Xeerka Summadaha Ganacsiga ee Dawladda Puntland. |
| 2. | **Wasaarad** | Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha & Maalgashiga ee Dawladda Puntland. |
| 3. | **Wasiir** | Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha & Maalgashiga ee Dawladda Puntland. |
| 4. | **Summad Ganacsi** | Waxaa loola jeeda wax kasta oo yeelan kara astaan gaar ah, laguna aqoonsan karo aragti, sida magacyada, ereyada, xarfaha, sawirada, astaamaha ama codadka, kuwaasoo loo adeegsanayo si loogu sooco badeeco ganacsi ama xarun bixisa adeeg. |
| 5. | **Summad Caalami ah** | Waxaa loola jeedaa summadaha ganacsi ee aan ku koobnayn dalka laga diiwaangeliyey. |
| 6. | **Maxkamad** | Waxaa loola jeedaa Maxkamadda awoodda sharci u leh dhegeysiga dacwadaha la xiriira summadaha ganacsiga. |
| 7. | **Ajnabi** | Qof kasta oo caadi ah ama shakhsi Qaanuuneed ah oo aan u dhalan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. |
| 8. | **Xafiis** | Waxaa loola jeedaa Xafiiska diiwaan-gelinta summadaha ganacsi ee lagu asaasay Qodobka 7-aad ee Xeerkan. |
| 9. | **Shahaado** | Waxaa loola jeedaa waraaqda caddaynaysa mulkiyadda summadda ganacsi ee la diiwaan-geliyey. |
| 10. | **Diiwaan** | Waxaa loola jeedaa diiwaanka summadaha ganacsi ee Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Maalgashiga ee Dawladda Puntland. |

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 2-aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Summadaha Ganacsiga Dawladda Puntland.

## Qodobka 3-aad
## Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan dhaq-dhaqaaqyada ganacsi ee la xiriira summadaha ganacsi ee deegaanadda Puntland.

## Qodobka 4-aad
## Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka Xeerkani waa:-

1. Ilaalinta iyo dammaanad-qaadka dhammaan summadaha ganacsi ee loo diiwaan-geliyey si waafaqsan Xeerkan.
2. Hubinta in dhammaan summadaha ganacsi loo diiwaan-geliyey si waafaqsan Xeerkan.
3. In la dhiirigaliyo hal-abuurka iyo ganacsiga ku dhisan tartanka furan ee caddaaladda ah, kuna salaysan bixinta adeegyo tayo leh.
4. In la dajiyo habraacyo iyo hagayaal lagu maamulo summadaha ganacsi ee la oggol yahay iyo kuwa ka reebban gudaha Dawladda Puntland.

## Qodobka 5-aad
## Mabaadi'da Xeerka

Xeerkani wuxuu ku dhisan yahay Mabaadi'dan soo socota:-

1. Ganacsiga xorta ah ee ku xusan Dastuurka Puntland Qodobkiisa 49-aad.
2. Ilaalinta xuquuqaha hantiyeed ee muwaadinka ee ku xusan Qodobka 17-aad, faqradiisa 1-aad ee Dastuurka Puntland iyo ka hortagga dhammaan wax walba oo wax-yeelaynaya.
3. Hubinta iyo ilaalinta tayada badeecooyinka iyo adeegyada ganacsi ee gudaha Dawladda Puntland.
4. Dhiirigelinta ganacsiga xalaasha ah ee waafaqsan Axkaamta Shareecada, mucaamalaadka Islaamiga ah iyo Dastuurka Puntland.
5. Bixinta magdhaw u dhigma dhibaatooyinka la soo gaarsiiyey ganacsiga lagu been abuurto summaddooda.

## CUTUBKA 2-aad
## DIIWAAN-GELINTA SUMMADAHA GANACSI
### Qodobka 6-aad
### Xaqa Is-diiwaan-gelinta

Xaqa is-diiwaan-gelinta waxaa yeelanaya cid kasta oo ka mid ah dhinacyadan hoos ku xusan:-

1. Qof kasta oo ah muwaadin Soomaaliyeed ama ajnabi oo leh shakhsiyad dabiici ah ama mid qaanuuneed oo ka ganacsada badeecooyin ama adeeg bixin.
2. Qof kasta oo kamid ah dadka ku xusan isla qodobkan, faqradiisa 1-aad, kuwaasoo doonaya inay adeegsadaan summad ganacsi oo u gaar yeelaysa badeecadooda, wax soo saarkooda ama adeegga ay bixinayaan waa inuu diiwaangashadaa summaddiisa ganacsi si waafaqsan xeerkan.

### Qodobka 7-aad
### Xafiiska Diiwaan-gelinta

1. Wasaaraddu waxay samaynaysaa Xafiiska Diiwaan-gelinta Summadaha Ganacsiga ee Dawladda Puntland.
2. Xafiisku wuxuu diiwaan-gelinayaa summadaha ganacsi ee ay leeyihiin ganacsiyada ka hawl-gala deegaannada Puntland.
3. Xafiisku wuxuu yeelanayaa diiwaanka summadaha ganacsi, kaasoo lagu diiwaan-gelinayo dhammaan noocyada kala duwan ee summadaha ganacsi, magacyada mulkiilayaasha, noocyada badeeco, adeeg ay qabato ama bixiso iyo dhammaan xogaha muhiimka ah ee la xiriira diiwaan-gelinta summadaha ganacsi.
4. Xafiisku wuxuu Diiwaan-gelin karaa oo keliya codsadaha buuxiyey shuruudaha ku xusan Qodobka 8-aad ee Xeerkan.
5. Qaab-dhismeedka Xafiiska waxaa qaabayn doona Wasaaradda.
6. Nooca Khidmadda diiwaan-gelinta summadaha ganacsiga waxaa jaangoynaya xafiiska diiwaan-gelinta summadaha ganacsiga, waxaana oggolaanaya Wasiirka, iyadoo la raacayo shaxda khidmadaha ee Xeerkan.

### Qodobka 8-aad
### Shuruudaha Diiwaan-gelinta

Xafiiska diiwaan-gelinta ee Wasaaraddu wuxuu diiwaan-gelin karaa oo kaliya marka uu codsaduhu soo buuxiyo shuruudaha soo socda:-

b. Waa inuu codsaduhu soo gudbistaa arji qoraal ah.
t. Waa in summadda codsaduhu rabo in loo diiwaan-geliyo aanay kamid ahayn summadaha ganacsi ee lagu mamnuucay Qodobka 12-aad ee xeerkan.
j. Waa inuu bixiyaa khidmadda diiwaan-gelinta summadda.

XAFIISKA XEER-ILAALIYAHA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

x. Waa inuu la yimaado aqoonsi dawladi bixisay.
kh. Waa inuu leeyahay shati ganacsi.
d. Waa inuu soo gudbiyo xeerka lagu asaasay shirkadda.
r. Wakaalad haddii mulkiiluhu maqan yahay ama summad Shirkad shisheeye ah la diiwaangelinayo.
s. Summadda ganacsi ee dalkiisa haddii Shirkaddu shisheeye tahay.

## Qodobka 9-aad
## Habraaca Diiwaan-gelinta

1. Xafiiska diiwaan-gelinta ee Wasaaraddu markuu xaqiijiyo in codsaduhu soo buuxiyo dhammaan shuruudaha diiwaan-gelinta ku xusan Qodobka 8-aad ee Xeerkan, wuxuu summadda ganacsi ku shaacinayaa warbaahinta madaxa bannaan iyo kuwa Dawladda.
2. Qof kasta oo cabasho ka qaba mulkiyadda summadda la shaaciyey, wuxuu muddo 45 casho gudahood ah ugu soo gudbinayaa cabashadiisa xafiiska diiwaan-gelinta summadaha ganacsiga ee Wasaaradda.
3. Marka ay dhammaato muddada shaacinta summadda ee ku xusan Qodobkan farqadiisa 2-aad, haddii la waayo wax cabasho ah ama cid sheegata mulkiyadda summadda ganacsi ee la shaaciyey wuxuu xafiisku codsadaha u diiwaan-gelinayaa summadda ganacsi, waxaana lagu qorayaa diiwaanka summadaha ganacsiga, waxaana la siinayaa shahaadada diiwaan-gelinta oo caddeynaysa mulkiyadda summaddaas, saxiixa ugu dambeeya ee shahaadada diiwaan-gelinta waxaa yeelanaya Wasiirka Wasaaradda.
4. Shahaadada diiwaan-gelinta ee lagu bixiyey si waafaqsan Qodobkan farqadiisa 3-aad waa inay ka muuqdan xogaha soo socda:-
   b. Tix-raaca diiwaan-gelinta summada ganacsi.
   t. Taariikhda la diiwaan-geliyey summadda.
   j. Magaca summadda ganacsi ama magaca qofka iska leh summadda iyo meesha uu ku nool yahay.
   x. Sawirka summadda la diiwaan-geliyey.
   kh. Xogta badeecadda, wax soo saarka ama adeegga ee summadda lagu diiwaan-geliyey.
   d. Lambarka iyo taariikhda soo kala horreynta dawliga ah si waafaqsan heshiiska caalamiga ah ee ilaalinta mulkiyadda warshadaynta.
5. Waxaa reebban in loo adeegsado summadda ganacsi ujeeddo baal-marsan middii loo diiwaan-geliyey si waafaqsan Qodobkan faqradiisa 4-aad xarafka (kh).
6. Xafiiska diiwaan-gelintu wuxuu diidi karaa codsiga diiwaan-gelinta summad kasta oo diiwaan-gelin loo rabo haddii uu xaqiiqsado inaysan summadu buuxin shuruudaha diiwaan-gelinta summadaha ganacsiga ee ku xusan Qodobka 8-aad ee xeerkan.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

7. Codsadaha loo diido diiwaan-gelinta summadda ganacsi si waafaqsan qodobkan, wuxuu cabasho u gudbisan karaa Agaasimaha Guud, haddii uu ku qanci waayona go'aankiisa, wuxuu cabashadiisa u gudbin karaa Wasiirka Wasaaradda oo leh maamul ahaan go'aanka kama dambaysta ah, haddii Wasiirku aqbali waayo cabashadiisa wuxuu u dacwoon karaa Maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka 10-aad
## Xuquuqaha ka Dhalanaya Diiwaan-gelinta

Diiwaan-gelinta summadda ganacsi waxaa ka dhalanaya xuquuqahan soo socda:-

b. Ilaalinta summadda ganacsi muddo dhan toban (10) sano, kana bilaabmaysa maalinta la diiwaangeliyey summadda.

t. Xaqa adeegsiga summadda ee mulkiilaha, iyadoo looga ilaalinayo dadka kale, inay adeegsadaan summaddiisa xaaladaha ay dhici karto in lagu khiyaamo dadweynaha badeecadda ama adeegga summaddan loo diiwaan-galiyey.

## Qodobka 11-aad
## Baabi'inta Summad Ganacsi

1. Mulkiilaha summad ganacsi wuxuu codsan karaa baabi'inta summad ganacsi, taasoo ku diiwaangashan magaciisa.
2. Xafiiska diiwaan-gelinta summadaha ganacsiga ama cid kastoo awood sharci u leh waxay baabi'in karaan summad kasta oo ganacsi hadday caddaato in diiwaan-gelinta summadda ganacsi lagu helay sifo baal marsan xeerkan.
3. Xafiiska diiwaan-gelinta summadaha ganacsiga iyo cid kastoo awood sharci u leh waxay dalban karaan baabi'inta summad ganacsi haddii mulkiilaha summadda ganacsi aanu adeegsan summadda muddo shan (5) sano oo xiriir ah.

## Qodobka 12-aad
## Summadaha Ganacsi ee Reebban

1. Astaamahan soo socda looma diiwaan-gelin karo summad ganacsi ahaan:-

   b. Summadda oo aan lahayn astaan gaar ah oo ka soocaysa summadaha kale.

   t. Summadda oo ay ka muuqato anshax xumo ama wax ka hor-imanaya Diinta Islaamka iyo nidaamka Dawliga ah.

   j. Astaanta oo leh ama shabahaysa astaan Diineed.

   x. Summadaha u eg astaanta qaran ee dalka sida calanka, astaamaha dawladda kale urur goboleedyada, ururrada dawliga ah iyo kuwa Caalamiga ah.

   kh. Magacyada dadka kale ama sawiradooda iyadoo oggolaansho laga haysan.

   d. Astaan laga soo tarjumay summad ganacsi oo la yaqaan.

   r. Summadaha ay leeyihiin dadka ay mamnuuca tahay ina lala shaqeeyo.

   s. Astaamaha adeegsigooda awgood noqday kuwa caan ka ah bulshada dhexdeeda.

   sh. Astaan walba oo ku salaysan nacayb, ka turjumaysa faquuq ama hayb-sooc, dhalin

karta xasarad ama kicin dadweyne.

dh. Astaan walba oo ka hor-imanaysa dhaqanka, aragtida iyo siyaasadda ganacsi ee Dawladda Puntland.

## Qodobka 13-aad
## Summadaha Ganacsi ee Horay u Jiray

1. Si loogu ilaaliyo summadahooda ganacsi, mulkiilayaasha summadaha ganacsi ee horey u jiray waa inay u diiwaangeliyaan summadahooda ganacsi si waafaqsan ee Xeerkan.
2. Khilaafaadka iyo murannada la xiriira lahaanshaha summadaha ganacsi ee jiray dhaqangalka Xeerkan ka hor waxaa xallinaya Xafiiska Diiwaan-gelinta Summadaha Ganacsi ee lagu asaasay Qodobka 7-aad ee Xeerkan, isagoo mudnaanta siinaya sida loogu soo kala horreeyey summadda la isku haysto.
3. Khilaafaadka iyo murannada la xiriira lahaanshaha summadaha ganacsi ee dhashay dhaqan galkan Xeerkan, kadib waxaa lagu dhaqayaa Qodobada Xeerkan.

## Qodobka 14-aad
## Summadaha Ganacsi ee Caalamiga ah

Ma bannaana diiwaan-gelinta summadda ganacsi oo caalamiga ah, taasoo aan oggolaansho ka haysan asalka cidii iska lahayd summaddaas.

# CUTUBKA 3-aad
# ADEEGSIGA, WAREEJINTA IYO RAHMIDDA SUMMADAHA GANACSI

## Qodobka 15-aad
## Oggolaanshaha Adeegsiga Summadda Ganacsi

1. Mulkiilaha summadda ganacsi wuxuu gabi ahaan ama qayb ahaan oggolaansho u siin karaa adeegsiga badeecadda ama adeegga ku diiwaaan-gashan summaddiisa ganacsi.
2. Heshiiska oggolaanshaha adeegsiga summadda ganacsi waa inuu noqdaa mid qoran, waana inaanu ka badan muddada xeerkani ilaalinayo summaddan.
3. Heshiiska oggolaanshaha summadda ganacsi waa inuu ka koobnaadaa arrimahan soo socda: -
   - b. Deegaanka ama dalka badeecada ama adeegga loo suuq-geynayo.
   - t. Muddada oggolaanshaha adeegsiga summadda ganacsi.
   - j. Baaxadda adeegsiga summadda iyo waxyaabaha la isla oggolaaday in loo adeegsado.
   - x. Habraaca qaybsiga ama wadaagga faa'iidada ama khasaaraha ka dhasha adeegsiga summadda ganacsiga.
   - kh. Ka fogaanta wax walba oo hoos u dhigi kara badeecadda ama adeegga.

XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

r. Ilaalinta tayada badeecada ama adeegga.
s. Wax walba oo sumcad darro u keeni kara summadda ganacsi.

## Qodobka 16-aad
## Wareejinta iyo Rahmidda Mulkiyadda Summadda

1. Waxaa bannaan wareejinta mulkiyadda summadda ganacsi ee la diiwaangeliyey, wareejintu waa inay ku dhacdaa si waafaqsan heshiiska labada dhinac, Qodobada wareejinta iyo rahanta ee ku xusan Xeerka Madaniga Soomaaliyeed.
2. Wareejinta mulkiyadda iyo rahmidda summadda ganacsi waa inay noqotaa mid qoran waxaana hagaya Xeerka Madaniga Soomaaliyeed.

# CUTUBKA 4-aad
# CIQAABAHA IYO MAGDHAWGA
## Qodobka 17-aad
## Ciqaabaha

1. Iyadoo aan wax loo dhimayn ciqaabaha ku qoran Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, waxaa lagu ciqaabayaa hal (1) sano oo xabsi ah iyo ganaax lacageed oo aan ka badnayn laba kun oo doolar ($2000) ama Sh.So u dhigma Qof kasta oo :-
   b. Ka been abuurta summad ganacsi oo diiwaangashan laguna ilaaliyey si waafaqsan Xeerkan.
   t. Soo bandhiga adeegyo wata summad ganacsi kuwaas oo laga been abuurtay.
   j. Iibiya ama iib u soo bandhiga badeeco wadata summad ganacsi oo laga been abuurtay.
   x. U isticmaala summadda ganacsi ujeeddo baalmarsan middii loo diiwaan-geliyey.
2. Haddii ay soo laabtaan xadgudubyada ku xusan isla Qodobkan faqradiisa 1-aad ciqaabaha waa la siyaadin karaa hadba sida garsooruhu uu u arko, waxaana la xiri karaa xarunta samaysay xadgudubka muddo aan ka badnayn shan (5) bilood.
3. Maxkamaddu waxay wax ku xukumi kartaa ciqaabo dheeri ah oo ku xiran hadba waynaanta xadgudubka, waxaana kamid ah ciqaabahaas: -

b. La wareegidda badeecadda la qabtay ee wadata summadda ganacsi ee laga been abuurtay.
t. Baabi'inta summadda ganacsi ee been abuurka ah.
j. La wareegidda qalabka loo adeegsaday been abuurka summadda ganacsi ee Xeerkan ilaaliyey.
x. In gabi ahaanba la joojiyo dhoofinta iyo soo dajinta badeecadda wadata summadaha ganacsi iyo magaca laga been abuurtay.
kh. In xukunka lagu faafiyo warbaahin rasmi ah, kharashka faafinta xukunkana laga qaado dambiilaha.

XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 18-aad
## Magdhaw

Qof kasta oo ay dhibaato ka soo gaarto fal-dambiyeedyada ku xusan Qodobka 17-aad faqradiisa 1-aad ee xeerkan, wuxuu xaq u leeyahay inuu dacweeyo eedaysanaha si uu magdhow u helo.

## Qodobka 19-aad
## Khidmadaha

1. Khidmadaha diiwaan-gelinta summadaha ganaciga waxaa loo raacayaa sida ku cad Lifaaqa Xeerkan.
2. Khidmadaha laga qaado summadaha ganacsiga waxay ka mid noqonayaan dakhliga guud ee Dawladda.

# CUTUBKA 5-aad
# QODOBBO GUNAANAD AH
## Qodobka 20-aad
## Tartamada Ganacsi ee Reebban

Waxaa reebban tartan ganacsiyeed kasta oo ka hor-imanaya tilmaamaha Xeerkan, waxaana kamid ah: -

b. Magac dilka qofka, badeecada ama adeegga summadda ganacsi ee cidda tartanka ganacsi ka dhaxeeyo.
t. Xayeysiisyada marin habaabinta ah ee ka fog runta.
j. Xadista siraha ganacsi.

## Qodobka 21-aad
## Xeer-Nidaamiye

Wasaaradu waxay awood u leedahay in ay soo saarto xeer-nidaamiye, wareegtooyin, hageyaal iyo tilmaamo lagu fulinayo qodobada Xeerkan oo aan ka hor-imaanayn Xeerkan.

## Qodobka 22-aad
## Burin

1. Xeerkan wuxuu burinayaa xeer kasta oo la xiriiray summadaha ganacsi oo aan la socon karin kana hor-imanaya Qodobada ku xusan Xeerkan.
2. Waxaa la buriyey Qodobka 30-aad iyo Qodobka 34-aad farqadiisa 7-aad, ee Xeerka Shatiyada Ganacsiga Puntland oo sheegaya warqadaha diiwaan-gelinta summadaha ganacsiga iyo khidmada laga qaadayo.
3. Qodobada ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, habka ciqaabta, Xeerka madaniga iyo habka Madaniga iyo dhammaan xeerarka kale ee xiriirka la leh, kuwaasoo aan ka hor-imanayn Qodobada xeerkan waa la dabaqayaa marka la fulinayo xeerkan.

## Qodobka 23-aad
## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka Golaha Wakiilladu Ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.